

Wadajir Ugu Jirna Kireyn Macquul Ah

Tani waa sannadkii saddexaad ay milkiilayaasha dhismayaashu dalbanayaan kirada aadka u sarreysa. Waxa kaliya ee adiga iyo damacooda u dhexeeya ayaa ah Ururka Kiraystayaasha Iswidhan (Hyresgästföreningen). Xubinimadaadu waxay naga caawinaysaa in aanu iska baacino kordhinta kirada aan macquulka ahayn iyada oo aan wadaagno aqoon iyo khibrad wadajir ah.

Maxaynu ka qabanaa Ururka Kiraystayaasha Iswidhan?

Sanad kasta, waxaanu ka wada gor-gortanaa kirada seddex milyan oo kirayste ah si aan u hubinno in kiradaadu ay ku jirto heer waaraya oo macquul ah Xubinimadaadu waxay gacan ka geysaneysaa dadaalladeena sifo qof walba uu u helo guri wanaagsan oo kharashkiisu macquul yahay.

Gor-gortanka kirada sanadka 2025

Kahor wada gor-gortanka kirada sanadkaan, dhowr milkiilayaal hantiyeed ayaa ku dhawaaqay inay rabaan inay kordhiyaan kirada illaa 15.4 boqolkiiba. Annaga oo isku imaana oo si wadajir ah uga gor-gortana, ayaanu gaari karnaa horumar kiro oo amaan ah oo xasilloon. Waxaan sii wadeynaa dagaalka si aan uga hortagno kordhinta kirada ee aan macquulka ahayn.

Noqo Xubin ka Tirsan Ururka Kiraystayaasha Iswidhan

Waxaanu ka shaqeyneynaa inaan hubinno inaad haysato amniga ugu badan ee gurigaaga. Annaga oo ka mid ah dhaqdhaqaaqyada dadka ugu caansan ee Iswidhan, waxaanu nahay garab xoog oo si wadajir ah u saameyn kara oo kor u qaadi kara saameynta gurigaaga, aaggaaga deggenaanshaha iyo guud ahaan siyaasadda guryaha.

Caawimada sharciga iyo talooyinka arrimaha guryaha

La-taliyayaasheenu waxay kaa caawinayaan dhammaan arrimaha la xiriira gurigaaga iyo kiradaada Waxa kale oo aad heli doontaa caawimaad sharci. Waanu ku garab taaganahay haddii muran khilaaf ka yimaado mulkiilahaaga guriga.

Ka Akhri waxii dheeraad ah oo ka noqo xubin adiga oo booqanaya: hyresgastforeningen.se

